



Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inay gaadhay wakhtigii uu kasoo bixi lahaa doonnida. Si wada jirana, Nuux iyo qoyskiisii waxa ay u dejiyeen xayawaankii.

19



Sidee haddaba Nuux uu arrintaas uuga mahad celin lahaa! Waxa uu dhisay meel allabari oo waxa uu caabuday Ilaahii isaga iyo qoyskiisaba ka badbaadiyay daadkii aadka u darnaa.

20



Ilaah waxa uu Nuux siiyay ballanqaad cajiib leh.

Waxa uu sheegay inaanu mardanbe dunida kusoo dayn doonin daad si uu denbiyadooda uugu ciqaabo.

21



Waxa uu Ilaah ballanqaadkiisa u sameeyay wax lagu xasuusto.

Jeegaanta ayaa waxa ay ahayd calaamadda u taagan ballanqaadka Ilaah.

22



Nuux iyo Daadkii Weynaa



Nuux iyo reerkiisii waxa ay heleen bilow cusub daadka dabadiis. Muddo dabadeedna, farcankiisii waxa ay dib u cammireen dhulka. Quruumaha dunida ku nool oo dhammina

waxa ay ka yimaaddeen Nuux iyo carruurtiisa.

23

Nuux iyo Daadkii Weynaa
Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah, Kitaabka Quduuska ah,
waxa laga helayaa
Bilowgii 6-10
"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu ku magacaabo denbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho.
Ilaah si aada ayuu inoo jecelyahay waxaanu soo diray Wiilkiisa, Ciise, si uu ugu dhinto Iskutallaab korkeeda una bixiyo qaanta denbiyadeenna.
Haddaad rabo inaad kasoo laabato xad-gudubyadaada, sidan ku dhex Ilaah: Ilaahaygii weynaayow, waxaan rumaysanahay inuu Ciise u dhintay aniga aawaday isagoo haddana nool. Fadlan ii kaalay oo iga cafi denbiyadayda, si aan imika u helo nolol cusub, oo aan adiga weligaa kuula jiro. Igu caawi inaan adiga awgaa u noolaado anoo ka dhigan ilmahaaga. Aamiin. Yooxanaa 3:16
Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba Ilaah la hadal!


Somali

Waxa qoray Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay Byron Unger; Lazarus
Waxa tarjumay Zemendale Translation Service
Waxa dhaqan-geliyay M. Maillot; Tammy S.
Qisada 3 ee 60
M1914.org
Bible for Children, PO Box 3, Winnipeg MB R3C 2G1 Canada
Lisaa: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Nuux waxa uu ahaa nin Ilaah caabuda. Qof walibana isaga wuu nacay oo waxay dadku caasiyeen Ilaah. Maalin ayaa dabeenta, Ilaah waxa uu isaga u sheegay arrin naxdin leh.

1



Ilaah wuxuu Nuux u sheegay "Dhulka waxaan ka baabi'in doonaa dulmi falayaasha." Waxa kaloo Ilaah isaga ku yidhi, "Qoyskaaga oo keliya ayaan badbaadin doonaa."


2

Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu iman doono daad weyn oo qarin doona dhulka oo dhan. Nuux waxa lagu amray, "Dooni ka samayso qoryo loox ah, oo ha noqoto mid ku filan qoyskaaga iyo xayawaan faro badan!" Ilaah waxa uu Nuux u sheegay sidii uu wax u samaysan lahaa, oo Nuuxna arrintaas ayuu ku mashquulay!




3

Shimbiro waaweyn iyo kuwo yaryar, dugaag yaryar, iyo kuwo dhaadheer dhammaantood waxa ay soo galeen doonnidii.



7



Dabeetana, Nuux iyo naagtiisii iyo saddexdiisii wiil iyo naaghoodii waxa ay galeen doonnidii. Oo Ilaahna waxa uu dabeeto xidhay albaabkii doonnida.

11



Markii muddo shan bilood ah daadku soconayay, Ilaah waxa uu soo diray dabayl wax qallajisa. Dabeetana doontii waxa ay ku si tartiib ah uugu dul fadhiisatay buuraha Araarad.

15

Waxa laga yaabaa in dadku ay ku qaylinayeen oo caayayeen Nuux markii uu xayawaanka ku gurayay doonnida.



8

Waxa kaddibna soo da'ay roobkii. Waxa dhulka oo dhan qariyay roob xooggan muddo gaadhaysa afartan cisho iyo afartan habeen.

12



16

Markii Nuux uu ka waramay sababta uu doonta u samaysanayo waxa dhacday in dadkii ay isaga ku


majaajilloodeen. Nuux laakiinse wuxuu iska sii watay samayntii doonta. Sidoo kale wuxuu dadka u sheegayay waxyaalaha Ilaah ku saabsan, balse cidina may dhegeysanin hadalkiisa.

4




5

Waxa dhacday in aanay denbaabitaankii ay Ilaah ku denbaabayeen aanay joojinnin. May odhanin aannu soo galno doonnida.




9




Biyihii daadka ahaa waxa ay qariyeen magaalooyinkii iyo xaafadihii. Markii roobku dhammaadayna, xitaa buuraha waxa qarinaayay biyo. Wax kasta oo noole ahaana waa uu dhintay.

13



17

Waxa haddaba imika yimid xayawaankii. Ilaah waxa uu keenay noocyada xayawaanka oo mid walba lab iyo dhedig ah.




6



Ugu danbayntii, xayawaankii iyo shimbiirihii waxa ay fuuleen doontii. Ilaahna waxa uu Nuux ku yidhi, "Soo gal doonnida adiga iyo dadka gurigaaguba."

10



14



18

Muddo toddobaad ah dabadeed, Nuux mar kale ayuu haddana tijaabiyay. Qoollaydii waxa ay markan lasoo noqotay iyadoo afka ku sidda caleen saytuun oo goyan. Usbuucii xigayna Nuux waxa uu ogaaday inuu dhulku engaganyahay waayo qoollaydii dib uuguma soo noqon isaga.